JAMHURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta

XAFIISKA MANAAHIJTA

# BARBAARINTA IYO CILMIGA BEESHA

## FASALKA KOOWAAD



JAMHURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta

XAFIISKA MANAAHIJTA

# BARBAARINTA IYO CILMIGA BEESHA


FASALKA KOOWAAD

1

*Buuggan lama daabacan karo lamana guurin karo iyadoo aan Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta laga helin oggolaansho*

*[illegible] Madbacadda Qaranka*

[illegible] — 1975



Jaalle S. G. Maxamed Siyaad Barre
Madaxweynaha G. S. K.

# TUSMO

Hogoldhig . . . . . . . . . . . . . . . . . 1
Calanka Soomaaliya . . . . . . . . . . . . . . 7
Magaalada . . . . . . . . . . . . . . . . . 10
Soomaaliya Dalkayaga Hooyo . . . . . . . . . . 14
Hawl iyo Hantiwadaag . . . . . . . . . . . . 17
Kacaanka . . . . . . . . . . . . . . . . . 22
Annagu Muslim baan nahay . . . . . . . . . . . 28
Shaqada iyo Shaqaalaha . . . . . . . . . . . . 33
Iskaa Wax U Qabso . . . . . . . . . . . . . 38
Dishibliinka iyo Usluubta . . . . . . . . . . . 41
Bulshada uu ardaygu ku dhex nool yahay . . . . . 48

// MAHADNAQ

Waxaan u mahadnaqaynaa qorayaashii kitaabkan oo ah :

Maxamed Cali Warsame

Ibraahim Maxamuud Abyan

Waxaa kaalmo ka geysatay :

Xaliima Cusmaan Axmed

Waxaa kaloo mahadnaq leh dhammaan dadkii kale ee suura geliyay soo saaridda kitaabkan oo ay ka mid yihiin garaacayaashii garaacay.

Xafiiska Manaahijta

# G O G O L D H I G

Maaddada Barbaarinta iyo Cilmiga Beesha waa maaddo ku cusub Manhajka dalkeenna Soomaaliya. Maaddadu waxay ka mid ahayd arrimihii badnaa ee muhimka wada ahaa ee ka maqnaa Waxbarashada iyo Barbaarinta, gaar ahaan, iyo guud ahaan Dalkoo dhan; waxayna la dhalatay Kacaankii 21da Oktoobar, 1969, sababta ay ula dhalatay kacaanka waxaa weeye, Kacaanka baahi baa keentay, wuxuuna u dhashay inuu xaqiijiyo ujeeddooyinka Ummadda, iyo inuu fuliyo Barnaamijka loogu tala galay in lagu hirgeliyo ujeddooyinkaas.

Hirgelinta ujeeddooyinka iyo barnaamijka waxay u baahan yihiin dad, runtii gartay oo aamminsan .... oo diyaar u ah niyo , garasho, iyo falid ahaanba, inay u hawl galaan oo u dhintaan. Taasi waxay u baahan tahay (barbaarin) ujeeddo leh. Maaddadaanina waxaa weeye jid cusub oo aynu ku doonayno inaan ilmaha ku siinno Abuur Soomaalinimo, iyo nuguur (dabeecad) toosan oo fayoow oo kacaan ah, si ay ku yeeshaan berri qofnimo suuban, waddaninimo, xilkasnimo, dulqaad, iyo dhammaan qiyamka la rabo oo fiican; maaddadaa nina waxay inoo horseedaysaa inaan abuurno mujtamac dadkiisu qiyamkaas leeyihiin, waana kan aynu doonayno.

Runtii, innagu intaasoo dhan ma wada siin karno ilmaha, maxaa jira, intooda badan waxay ka mid yihiin nuguurtiisa (dabeecadiisa) asalka ah. Hase yeeshee, innaga shaqadeennu waxay tahay inaan barbaarinno, korinno, kordhinno, oo qaabinno, nuguurta uu ilmuhu ku dhashay (in-born qualities).

Sida cuntadu, biyahu, qorraxdu iyo hawadu ay u barbaariyaan (u koriyaan) nafleyda, xayawaanka iyo dadka iyo geedaha iwm, ayay waxbaridda iyo barbaarinta saxa ahi u siiyaan qofka korriimo caqli, caadifo iyo jir. Macnuhu waxaa weeye, qofnimada waxaa isla sameeya : Nafaqada, aqoonta (waxbarida iyo barbaarinta), iyo dhaqanka, ama nolosha ku wareegsan ee uu ku dhex nool yahay.

Qofnimo waxaan uga jeednaa nuguurta, asluubta iyo kartida qofka loogu sooco dadka kale. Qofnimadu waa sida qofku u dhaqmo iyo siduu u fakaro : waxa la xun iyo waxa la fiican, wuxuu macaansado iyo wuxuu kharaarsado.

Waxaa la yiraahdaa nuguurta ilmaha marka ay dhashaan waa (dhexdhexaad) «neutral», laakiin marka dambe waxay u dheeliyaan dhinaca loo (barbaariyo) inta ay yar yar yihiin. Soomaalidu waxay tiraahdaa (Caruurtu gaal iyo muslim midna maaha ee waa kii lagu daro). Haddaba waxaa la oran karaa, ilmuhu marka ay yihiin da'daas (ilaa 9 sano) ayaa qofnimadoodu (tallaalantaa). Sidaas awgeed waxaa inala gudboon, haddii aan nahay barayaalka iyo barbaariyeyaalka inaan xooggeenna saarro barbaarinta ilmaha inta ay yar yar yihiin, oo aan ku tallaalno nuguurta iyo tilmaamaha aan la doonayno ilmaha. Taasi waa xilka ay Ummaddeennu ina ku aammintey; maaddadaanina waa jidka ina ku kaalmeynaya sidii aan xil kaas uga soo bixi lahayn.

Barbaarinta iyo waxbaridda waxay had iyo jeer yihiin kuwa qofnimada xumaanta ka goynaya, uguna beddelaya wanaag. Waxay siiyaan dadka qalab-mid muuqda iyo mid aan muuqan-gayeysiiya inay ku hagaajiyaan noloshooda, kuna daaweeyaan dhibaatooyinka hadba la soo gudboonaada, si ay ula socdaan isbeddelka taariikhda. Marka Barbaarintu waa mid aan ku doonayno qofnimo wanaagsan oo karti leh. Waxaa isweydiin leh, kofnimo ma wax taagan baa mase maya? Borofesor Maurice, Ameerikaan, wuxuu inoo sheegay : «Waxa qofka noqonayaa waa inuu noqdaa Isbeddel Soconaaya oo joogto ah, oo la socda isbeddelka ( taddawurka) taariikhda». Haddaba waxaa la oran karaa qofnimadu waa isbeddel soconaaya. Isbeddelkaasi sidee u yimaadaa? Waagii kasta meeshii kasta iyo wixii kastaba wax baa kaaga siyaada. Qofkii aad la kulantidba waa kuu adduun cusub! Sidoo kale shaygii (Miis, matalan) aad aragtid wuxuu ku siinayaa aqoon hor leh. Haddaba weligaa isbeddel baad ku jirtaa. Qofka gaarka ah iyo aqoonta uu ka helayo dibaddiisa ayaa soo saara qofnimada gaarka ah ee qofka ku jirta. Haddii qof kasta qof kale iyo

shay wax ka barto, si uu qofnimo fiican u yeesho, waxaa waajib ah in qof kasta iyo shay kasta hagaagsan yihiin, illeen ayagaa qofnimada abuuree; danta laga leeyahay (Barbaarinta iyo Cilmiga Beeshana) waxaa weeye in lagu hagaajiyo qofka, qofkuna markiisa, qof kale iyo waxaa la xiriira noloshiisa u hagaajiyo.

Qofnimo wanaagsani ma soo baxdo ayadoo aan dibadda laga qorin (dibadda dad ka barbaarin). Qofka waxaa dadnimadiisa dhisa macamilka iyo isafgaradka (tajaawubka) uu dadka kale la leeyahay. Tajaawub iyo macaamil hagaagsanna waxaa abuuri karaa (macallin wanaagsan). Maxaa yeelay (jira) waa macallinka qofka u gudbiya abuurka (ilmaha) mujtamaca runta iyo qiyamka toosan ee keena macaamilka iyo tajaawubka isla noolaanta iyo isjacayka, qofkuna sidiisa wuxuu u jiraa ama u jooga oo uu qaymo ku leeyahay qof kale daraaddii. «Albert Bawber» ayaa arrintaas si cad u sheegay markuu yiri : «Anigu, Adiga» (I - THOU). Anigu waa Adiga, Adiguna waa Aniga. Anigu waxaan u jiraa adiga daraaddaa, Adiguna waxaad u jirtaa aniga daraaddeey. Adigu ma jirteen aniga la'aantay, aniguna ma jireen adiga la'aantaa! Xigmadaasi qayma weyn bay inoo leedahay, innaga barbaariyayaalka ah.

Maxaa jira waxay inoo sheegaysaa in qaymaha qofku yahay, wuxuu ka helay qof kale.

Laba wax oo waaweyn ayaa qofka gaar ahaan macallinka, ama dugsiga ka helaa : run cilmi ah iyo qiyam (Moralities). Cilmigu qofka ma abuuro, laakiin qofka ayaa abuura cilmiga. Qof kasta cilmiga ma abuuro waxaa abuuri karaa qofka leh qiyamka wanaagsan; barbaarintuna waa jidka lagu abuurayo qof qiyamkiisu hagaagsan yahay si uu cilmi u sameeyo. Cilmina sidiisa waa Lawade (value guided). Haddaba Maaddada Barbaarinta iyo Cilmiga Beeshu waa hooyada culuumta kale. Waxaa la oran karaa culuumta kale waxay u shaqeeyaan maaddadaan, maxaa jira waxay dhisaysaa qofnimo, culuumtuna waxay u shaqeeyaan qofka, qofkaana keenay. Taasi waxay run noqon kartaa marka macallinku garto fartiintiisa (risaaladiisa) ah barbaarinta.

Run ahaan, qiyamku maaha wax guud oo dunidoo dhan ka dhexeeya (universal). Laakiin, mujtamacaadka dunidu waa kala duwan yihiin. Waxyaalaha ay ku kala duwan yihiin waxaa ugu weyn : dhaqanka iyo nidaamka (system) dhaqaala-ha. Mujtamac kasta wuxuu leeyahay dhaqan u gaar ah iyo nidaam uu rabo inuu dhaqaalihiisa ku dhiso; mujtamac kasta-na dadkiisa wuxuu u barbaariyaa si waafaqsan dhaqankiisa, siyaasaddiisa, dhaqaalihiisa iyo siduu ka rabo aayatiinkiisa dambe. Sidaa daraaddeed, innagu waxaan leenahay dhaqan gaar ah (Islaami ah), nidaam aan doonayno inaan dhaqaale-heenna ku dhisno (Hantiwadaag) iyo ujeeddooyin fog. Maad-dada Barbaarinta iyo Cilmiga Beeshuna waa inay noqotaa mid waafaqsan oo u shaqeeysa dhaqankeenna, siyaasaddeenna, dhaqaalaheenna iyo ujeeddadeenna fog .

Maaddadaan marka la dhigayo oo ilmaha la barayo, waa inayan ku koobnaan casharrada Buuggaan ku qoran oo kaliya, Mar kasta waxaa soo kordha arrimo cusub, waxaana dhaca isbeddel. Waxaa la yiraahdaa (waagii baryaba geddisa «Xaal-kiisa» leh). Haddaba, waa in ilmaha lala socodsiiyaa hadba waxa soo kordho iyo isbeddelka dhaca. Waxaa kale oo aad wax kuu taraya, haddii aad tahay macallinka, suugaanta Shacabkeenna Soomaaliyeed. Taas dambe aad bay muhim u tahay maxaa yeelay, waxaa aad ilmaha aamminsiinaysid wa-xaa ugu weyn ummaddooda iyo dhaqankooda. Marka wax kasta oo la barayo waa in lagu baraa dhaqankooda iyo suu-gaantooda, kuwaas oo ah ruuxa Ummadda. Ilmuhu waa inay noqdaan ruuxa ummaddooda ee dhaqdhaqaaqa, iyo caqligeeda fakara iyo aydiyoloojiyaddeeda wax dhista.

Kitaabkaani waa kan 1aad ee Maaddada (Barbaarinta iyo Cilmiga Beesha). Waxaa loogu tala galay Fasalka 1aad ee Dugsiyada Hoose, Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Ilmuhu marka ay ku jiraan heerkaas, waxaa waajib ah in lagu tallaalo kacaanimo, oo lagu tallaalo waxa la rabo inay noqdaan berri. Sidaas awgaaeed, waxaan u bixinnay Fasalka 1aad «Heerkii Tallaalka», ama Talqiinta. Macnuhu waxaa weeye in la tallaalo akhlaaqda, dhaqanka, fikradda, caadifadda iyo wax kastoo taabanaya damiirka (Conscience) ilmaha, loona barbaariyo inay noqdaan geesiyaal iyo hanadyo.

Casharrada aan u doorannay Fasalka 1aad waa casharro ku xiraya ilmaha dalkooda iyo ummaddooda. Casharradaasi waxaa weeye : Calanka Waddaniga ah, Soomaaliya : dalkayga Hooyo, Magaaladayda, Anigu Muslim baan ahay, Kacaanka iyo Hantiwadaagga, Iskaa Wax U Qabso, Shaqada iyo Shaqaalaha, Dishibiliinka iyo Anshaxa, Bulshada ardaygu ku dhex nool yahay. Casharradaasi waxay taabanayaan Rukumada asaasiga ah ee qowmiyadda Soomaaliya, waxaana loogu soo hor mariyey inuu ardaygu jeclaado dalkiisa iyo ummaddiisa, oo uu ku abaabo.

Cashar kasta oo casharradaan ka mid ah waxaa laga leeahay ujeeddo. Waa in macallinku hubiyaa inuu gaarsiiyey ujeeddadaas iyo fikradda asaaska ah ee ku jirta cashar kasta.

Kitaabkani waa Tusmo-Bare. Waxaa loogu tala galay macallinka Kaliya. Cashar kasta, waxaa la socda cashar-bixintiisii iyo sharaxiisii. Qorayaalku waxay isku dayeen inay macallinka ka furtaan hawl uu qaban lahaa oo waqti dheer ka qaadan lahayd. Waxaan filaynaa in Buuggaani noqdo mid faa'iidooyin badan u yeesha macallinka, oo uu ka tilmaan qaato sida casharka loo bixiyo ilaa Dugsiyada Sare.

Cashar-bixinta la socota cashar kasta ma noqon karto tii ugu wanaagsanayd. Waxaan qabnaa in macallinku samaysan karo dariiqad ka wanaagsan ee cashar-bixin ah. Waa macallinka gefka la imaan kara qalabkiisa. Meeshii la joogaba waxay leedahay qalabkeeda, waxaa wanaagsn in cashar kastaaba ku soo dhammaado hees.

Heesaha aan soo qoray ma dhamma. Raadso sidii aad ku heli lahayd, gaar ahaan heesaha laga qaado magaalada ay ardaydu ku nool yihiin. Taasi waa muhim. Laakiin waxaa lagama maarmaan ah in ay waafaqsan yihiin darsiga iyo ujeeddadiisa.

Ugu dambaystii, Kitaabkani waa tijaaba cusub oo ka timid dad ay ugu horrayso wax qoriddu. Kitaabka iyo Maaddadda guud ahaan waxaa loo arkaa inay yihiin Cilmi iyo Falsafad ku cusub Manhajka Waxbarashada dalkeenna. Falsafadda uu ku fadhiyaa waa ku cusub tahay macallinka iyo dad-

weynahaba intooda badan; Jaallayaasha Buugga qorayna waxay ka mid yihiin dadkaas ay Maaddadda iyo fanka wax qoridduba ay ku cusub yihiin.

Shaki ma leh in Kitaabkan sidaan si ka wanaagsan loo qori karo. Waxaa kale oo hubaal ah in ay jiraan gafaf iyo nuqsaan. Sidaas awgeed, waxaan ka codsanaynaa in macallinku wixii gef ah ama nuqsaan ah oo uu ku arko Kitaabkan uu soo gaarsiiyo Xafiiska Manaahijta ee W. W. B. Waxaana kaloo ka rajaynaynaa inuu noo dulqaato, annaguna waa ka cudurdaaranaynaa wixii qaladaad ah oo ka muuqda Kitaabka.

«Eebbe ha ina waafajiyo».

Casharka 1aad

# CALANKA SOOMAALIYA

**Tusaale Guud :**

Casharka ugu horreeya maaddada Barbaarinta iyo Cilmiga Beesha, tarbiyada waddaniga ah, ee ilmaha la siinayo, waxaan u doorannay Calanka Ummadda Soomaaliya. Calanku waa calaamadda dalkeenna. Wuxuu tilmaamayaa dawladnimadeenna, xorriyadeenna, madaxbanaanideenna, iyo midnimada Ummaddeenna.

Calanku macne weyn buu noo leeyahay. Wuxuu tilmaamaayaa dagaalkii dheeraa ee dadkeennu u soo galay gobanimada, iyo sidii loo helay calanka : Wada jir baa lagu helay, waa loo wada dagaallamay, waa la isugu tegey, dhiig badan baa ku daatay, dhimasho iyo dhaawacba, waa la isu masaafuriyey, waa loo wada dhibtooday. Waxaasoo dhan, isticmaar baa sameeyey.

Calanku wuxuu mudan yahay jacaylka dadkoo dhan iyo xurmadooda. Wuxuu mudan yahay in la daafaco oo loo dhinto, wuxuu u taagan yahay xorriyadeenna, qaranimadeenna, nafteenna, sharafteenna iyo jiridda dawladnimadeenna. Sidaas daraaddeed Calanku wuxuu istaahelaa inuu noqdo furaha casharrada kale. Ardayga casharka ugu horreeya waligii ma illoobo, waligii waa xusuustaa.

Ulajeeddada Casharka :

1. In ilmaha la baro in Calanku yahay calaamad tilmaameysa xorriyadda, madaxbannaanida, qarannimada iyo midnimada Soomaaliya.
2. In lagu tallaalo ardayda shucuur waddani ah, si uu naftiisa ugu huro oo uu daafaco calanka.

**Qalabka loo isticmaalayo :**

1. Calanka oo weyn (1m × 80cm.);
2. Calanka masawirkiisa oo ay hareeraha ka taagan yihiin kooxo arday ah ayagoo salaamaya.

3. Calanka masawirkiisa oo ay hareerka ka taagan yihiin kooxo ah, Ciidammada Qalabka Sida, iyo dhallinyarada.
4. Masawir tilmaamaya nafti hure u dhintay Calanka.

**Bandhigga Bilowga Casharka :**

Tillaabada 1aad : su'aalo waydii ay ka mid yihiin :

1. Kani waa maxay? Jawaab, waa Calan. Calanku hortaada ha yaallo.
2. Yaa leh? Soomaaliya.
3. Dawlad kale ma leedahay calankaasi? Maya.

Sawirka 2aad : Calanka kooxo arday ah ay hareeraha ka taagan yihiin oo ay, salaamayaan.

Sawir calanka oo ay hareeraha ka taagan yihiin xoogga Booliiska iyo dhallinyarada.

4. Midabkiisu waa sidee? Waa Buluug.
5. Dhexdiisa maxaa ku yaal? Xiddig
6. Xiddigtu maxay leedahay? Shan gees.
7. Shanta gees maxay tilmaamayaan? Soomaali weyn.
8. Hadda ka hor ma'aragtay? Haa.
9. Haddii aad aragtay, xaggee ku aragtay? Ha sheegeen ardaydu meesha ay ku arkeen.
10. Waydii inay calama kale arkeen iyo in kale. U sheeg waxay Calamdu ku kala duwan yihiin.
11. Waydii, muxuu calanku tilmaamayaa. Aad u sharax waxa uu tilmaamayo.

Jawaabaha su'aalahaas ardayda si fudud ugu sharax oo ay fahmi karaan. U sheeg in dawlad kasta ay leedahay calan u gaar ah. Had iyo jeer la soco ardayda garashadooda iyo da'dooda.

Tillaabada 2aad Uruurin Casharka :

U akhri ardayda hadalkaan soo socda, oo ha qaybeen:

Calankeenna waa jecel nahay. Aad baan u jecel nahay. Wuxuu tilmaamayaa dawladnimadeenna, **xorriyadeenna qarannimadeenna iyo midnimadeenna.**

Dal kasta wuxuu leeyahay calan u gaar ah. Annagu waxaan leenahay calan noo gaar ah, waa Calanka Soomaaliya.

Calankeenna waa qurux badan yahay. Midabkiisu waa Buluug.

Cirkuu u eg yahay. Xiddig baa dhexda kaga taal. Xiddigtu shan gees bay leedahay. **Shanta gees** waxay tilmaamayaan **qaybaha dalkeenna** Soomaaliya, calankeenna waa jecel nahay. Markii la saarayo waa u **istaagaa** oo waa **salaamaa.**

Markii la dajinayo waa u istaagaa oo waa salaamaa. Calan keenna waa jecel nahay **Cadawga** waa ka ilaalinayaa.

Ereyada madmadow ardayda si, gaar ah ugu macnee. Aad ha u garteen.

Tillaabada 3aad : Layli

1. U dir ardayda in ay soo sawiraan calanka Soomaaliya;
2. Ardaydu waxay arkaan calammo badan oo kala duwan sida : Calamada Dawladda, Dawladda Hoose.

   U dir ardayda inay soo sawiraan calamadaas kala duwan, oo ay kala aqoon sadaan. Ardaydu ha soo arkeen meelaha Calanka la saaro. Macallinku ha tuso ardada meelaha labada calan la suro.

Casharka 2aad

# M A G A A L A D A

**Tusaale Guud :**

Sawir : Magaalo weyn.

Casharkaan oo ah kii 2aad, waxaa ilmaha lagu barayaa magaaladooda, tuuladooda ay markaas joogaan. Marka aad ilmaha magaaladooda baraysid, waxaad ka baraysaa dhawr meelood :

1. Waxaa lagu barayaa magaalada iyo xaafadaheeda dadka deggan inay yihiin waalid iyo walaalo.
2. Dugsiyada, isbitaallada, iyo xafiisyada dawladda, faa'iidadooda iyo dadka ka shaqeeya waxa ay noo qbtaan. Uga sheekee dadka ka shaqeeya inay yihiin walaalaheen iyo waalidkeen ayna innaga noo shaqeeyaan.
3. Suuqyada, dukaamada, makhaayadaha, masaajidka, iwm. Faa'iidadooda iyo waxay noo qabtaan.
4. Jerdiinooyinka, ceesha, waraha, wabiyada, badda, hadday jiraan, iyo faa'iidadooda.

Marka aad meelahaas ka sheekeynaysid, iyo dadkaba, soo tus ilmaha dadkaas ayagoo labiskoodii qaba, koox kasta labiskeeda. Si gaaban ha u yiraahdeen : «annagu waxaas iyo waxaas ayaan qabanaa, waxaanna nahay Soomaali».

**Ulajeeddada Casharka :**

1. In la baro ilmaha magaaladooda;
2. In la baro meelaha muhimka ah, dadka meelahaas ka shaqeeya, faa'iidadooda iyo waxay u yihiin;

3. Ulajeeddada ugu weyn waxaa weeye in la baro ilmaha in dadkaasoo dhami ay yihiin Soomaali ilmaha la yiraahdo «adinkuna Soomaali baa tihiin, annagoo dhan Soomaali baan nahay».

**XUSUUS** : Casharkakan 3 cashar u qaybi oo kala ah :

1. Magaalada iyo xaafadeheeda guud ahaan iyo halka caanaha, khudradda iwm., ay ka helaan.
2. Dugsiyada, cinsbataalka iyo xafiisyada.
3. Suuqyada, dukaamada iwm.

**Qalabka loo isticmaalayo :**

1. Baladka/Tuulada (Sawir);
2. Sawirrada : dugsiyada isbitaallada, Boostada, xafiisyada dawladda ee kale, suuqa, masaajidka iyo dadka sida : macallimiinta, takhtarka, booliiska, millateriga ee shaqooyinka kala duwan haya;
3. Dad ardada shaqadooda uga warrama, sida dhakhtarka, beeralayda, booliiska iwm.

Sawiro: Dugsiyo, Isbitaallo, Xafiisyo ee dad kala duwan ka shaqaynayaan.

**Bandhigga (Bilowga) Casharka :-**

Waydii su'aalaha soo socda :

**Tillaabada 1aad :**

1. Waydii ardayda magaca magaaladooda.
2. Sabbuurada ku qor xuruuf waaweyn oo midab leh magaca magaalada.
3. Waydii ilmaha inay gacanta taagaan inta ku nool magaalada oo deggan. Adiguna gacanta la taag. Dheh : aniga iyo adinkuba magaaladaan deggan nahay. Magaaladu waa magaaladeennii.
4. Waydii ilmaha magaca dugsiyadooda iyo kuwa kale ee magaalada ku yaal. Magacyada dugsiyadaas sabuuradda ku qor, haddii ay jiraan dugsiya kale.

5. Waydii dadka dugsiyadaas ka shaqeeya iyo kuwa wax ka barta (ardayda), ilmaha baladka u sheeg in ayagu dugsiga leeyihiin, in magaaladuna tahay magaaladooda.
6. Sidoo kale ilmaha u sheeg inta isbitaal magaalada ku taal. Uga sheekee faa'iidada ay isbitaalladu u leeyihiin ilmaha iyo dadka oo dhan.
7. Sidoo kale, meel kasta oo magaalada ah waa in ardayda iyo macallinku isla baaraan, isla afgartaan in meeshaasoo dhan ay leeyihiin, iyo ereyo oranayo; innagaa leh meelahaas, waa hantideennii. Sidaas iyo sidaas bay noo anfacaan. Waxaas iyo waxaas bay noo qabtaan. Markaas ka dib waa in ardaydu gartaan meel walba dadka ka shaqeeya inay ayaga u shaqeeyaan markaas ay walaalahood yihiin iyo waalidkood, iyaguna (ilmaha) sidaas daraaddeed way jecel yihiin.
8. Si' gaar ah, ilmaha ugu sheeg inta suuq ku taal magaalada, waxa lagu iibiyo, mid walba, dadka wax ku iibiyo faa'iidada ay u leeyihiin dadka, beesha ay ku dhex nool yihiin (ardaydu). U sheeg faa'iidada; miitaal : hilibka, caano, qudaar, furuto, ama faakihad, dhuxul, qoryo ama xaabo, iwm.
9. Waydii ardayda. Maka maarmaa : hilibka? Caanaha? Masaggada ama gelleyda? Mooska? dhuxusha? iwm. Jawaab, maya. Waydii mid kasta sida ay noo anfacdo.
10. Sidaasoo kale, waydii oo tus ilmaha faa'iidada ay u leedahay magaaladoodu; dukaamada, makhaayadaha, masaajidk, gaadiidka, jidadka, dhulka nasashada, xeryaha xoolaha, ceesha, barkadaha, iwm.
11. U sheeg ilmaha in waxaasoo dhan oo magaalada laga helo aan wada leenahay oo ay na wada anfacaan.
12. U sheeg ilmaha wax kastoo magaaladooda laga helo in laga helo dalka Soomaalia, dalkooda weyn. U laqin in dalkoodu yahay gurigooda hooyo. U sheeg degmada ay magaaladoodu ku taal, iyo gobolka ay ku taal, u sheeg degmada iyo gobolkuba in ay Soomaaliya ka mid yihiin.

## Tillaabada 2aad : Ururinta Casharka

U akhri ardayda hadalkaan soo socda :

Magaaladayadu waa fiican tahay waxyaalo badan baa laga helaa. Waxaa ka mid ah : Dugsiyo aan wax ku baranno, isbitaallo aan daawada ka qaadanno. Suuq aan wax ka gadanno. Boostada aan waraaqaha ku dirsanno. Xafiisyo Dawladda. Dukaamada iyo Makhaayadaha aan wax ka gadanno. Masaajid aan ku tukanno. Jardiinooyin, Jidad, Ceelal, Waro, iwm. Meelahaasoo dhan waa na anfacaan. Dadka ka shaqeeyana annagay noo shaqeeyaan. Waa walaalahayo. Waa waalidkayo. Dhammaantayo Soomaali baan nahay. Walaalaan nahay.

Magaaladayadu dalkayaga ayay ku taal. Dalkayagu waa Soomaaliya. Soomaaliya waa dalkayaga. Waxaan u koraynaa inaan u shaqaynno dalkayaga Soomaaliya.

## Tillaabada 3aad : Shaqada Guriga

U dir ilmaha inay soo sheegaan magacyada meelaha oo aan kor ku soo sheegnay. Faa'iidadooda, iyo dadka ka shaqeeya iyo faa'iidadooda, af ahaan ha ugu sheekeeyaan.

Casharka 3aad

## SOOMAALIYA DALKAYAGA HOOYO

**Tusaale Guud :**

Casharkaan oo ah kii 3aad, ardaydu waxaa lagu barayaa Dalkooda Hooyo, Soomaaliya. Ilmaha waxaa loo korinayaa oo ay wax u baranayaan inay waddanka anfacaan, inay waddanka u shaqeeyaan oo ay shaqaale daacad ah noqdaan. Taasi waa hadafka weyn oo aannu ka leenahay tacliinta. Haddaba, waxaa lama huraan ah inay bartaan oo ay daafici doo naan. Si loo baro loona jeclaysiiyo dalkooda Soomaaliya, waa waajib in casharrada ugu horreeya laga dhigo dalka ardayda, cashar kastana la soo geliyo.

Waxaa la oran karaa, darsigaani ilmaha waa ku adag yahay. Aragtidaas waxbaa ka jira, hase yeeshee, waxaan qabnaa in ardayga iyo fududaynta darsigu ayan ahayn keliya dabeecadda casharka, ee waxaa kaalin weyn ku leh **BARAHA** bixinaya dersiga, hadba siduu u dhigo, dariiqadduu isticmaalo, qofnimadiisa, waayo — aragnimadiisa, diyaarnimadiisa iyo shaqa badnaantiisa.

In kastoo uu adayg yahay casharkaani, wuxuu leeyahay qiimo gaar ah oo badan. Wuxuu u baahan yahay siduu u adagyahay una qayma badan yahay in loo diyaariyo oo looga shaqeeyo. Ka fakar xeesha ugu fudud ugana sahlan ee ay ilmuhu ku fahmi lahaayeen Soomaaliya, kuna jeclaan lahaayeen dhulkood. Ujeeddadayadu waxaa weeye inaan carruurta jeclaysiinno dalkooda hooyo. Siduu baruhu ku jeclaysiin karaa?

Dalkeennu waa weyn yahay, wuxuu leeyahay meelo qurux badan. Waxaa waajib ah markaad casharkan dhigaysid inaad caruurta uga sheekaysid ambaba aad tustid meelaha quruxda badan : wabiyada, badaha, togagga, toomaha, buuraha, beeraha, magaalooyinka waaweyn, daaraha dheerdheer, meelaha taariikhda leh, jidadka, jardiinooyinka, xoolaha ugaarta, dugaagga iwm. ee laga helo Soomaaliya. Carruurta dalkoodu halla weynaado, ha jeclaadeen, ha isku soo soceen waddankooda iyo calankooda. Waa inay iskula weynaadaan dalkooda.

**Ulajceddooyinka Casharka :-**

In ilmaha la jeclaysiiyo oo lagu xiro dalkooda, qawmiyaddooda iyo ummaddooda, si ay ugu faanaan oo ay iskula weynaadaan uguna shaqeeyaan.

Sawir muujinayo wabiyaal, badda, beeraha, toomah, xoolo kala duwan, ugaar dugaag.

**Qalabka la isticmaalayo :**

1. Khariidadda Soomaaliya (Soomaali Weyn);
2. Sawirro dalka ah : badaha, wabiyaasha, togagga, toomaha, buuraha, hawdka, iwm. Xoolaha, iyo xaywaanka duurka ku nool, dalka Soomaaliya, meel kasta wax kasta qurux leh. Waxyaalahaasoo dhan masawir ahaan u tus.

**Bandhigga (Bilowga) Casharka :**

**Tillaabada 1aad :**

1. Waydii ilmaha magaca magaaladooda.
2. Waydii degmada iyo gobolka ay ku taal.
3. Waydii magaalada, waddanka ay ku yaalliin. Jawaab. Soomaaliya.
4. Soomaaliya waa dalkee? Jawaab : waa dalkayaga.
5. Dalkaagu ma qurux badan yahay? Haa.
6. Tus sawirro ah buuraha, badaha, wabiyada, toomaha, ballida, howdka, meelaha kale sida beeraha, warshadaha, jidadka, jardiinooyinka, magaalooyinka waaweyn, daaraha dheerdheer, sida Huteelka Jubba, xoolaha la dhaqdo sida geela, ariga iyo lo'da, ugaarta, goroyada, deerada iwm., dugaagga sida libaaxa, maroodiga, shabeelka, iwm.
7. Waydii, dhulkaagu ma qurux badan yahay? Ha ku celiyeen meelihii iyo waxyaalihii aan soo sheegnay.

8. Soomaaliya ma jeceshahay? Jawaab, haa.
9. Maxaad ku jeceshahay? Sheeg faa'iidada dalka. Casharkaan iyo kii ka horreeyey isku xir, iyo kii saddexaadba. Su'aalkasta gaar ahaan u sharax jawaabteeda.

**Tillaabada 2aad : Ururinta Casharka**

U akhri ardayda hadalkaan soo socda oo ha qaybeen :

Soomaaliya waa dalkeenna. Waa dalkeenna **hooyo.**
Annagu Soomaali baan nahay.
Dalkeennu waa Soomaaliya
**Awowgay baa ku dhashay**
**Aabbahay baa ku dhaqday**
**Annagaa ku dhalannay**
Dalkeennu waa weyn yahay
Soomaaliya waa weyn tahay
Soomaaliya fiicanaa, fiicanaa
qurux badanaa, qurux badanaa
qaaya weynaa.

Dalkeennu wuxuu leeyahay
**Wabiyaal** biyo badan. Bad xeeb dheer leh.
**Buuro** dheerdheer.
**Togag** iyo durduro biyaha keena
**Toomo** doog ah. Beero wax
walba ka baxaan. **Warshado** waaweyn
xoolo badan. **Ugaar** cayn kastaa.
**Dugaag** kala duwan. Waxaasoo dhan
waa na **anfacaan** waana ku nool nahay.
Dhammaan waa xoolahayagii.

Ereyada madmadaw u macnee ardayda. Hubso inay darsiga garteen iyo in kale.

**Tillaabada 3aad : Shaqada Guriga**

U dir ardayda ha soo arkeen hana soo sawireen meelaha muhimka ah ee dalka sida beeraha, buuraha, wabiyada, badda, toomaha, xoolaha, ugaarta, dugaagga iwm.

# HAWL IYO HANTIWADAAG

## Tusaale Guud :

Waxaa jirta in mawduucan ku fiican yahay dad da'dooda iyo aqoontoodu intan ka sarrayso. Hase yeeshee waa lagama maarmaan in iyagoo cumri iyo waayo arag intaas ka qaba loo dhigo. Mabda'aanu waa falsafada la doonaayo inay hoggaamiso ardayga berri iyo maanta, yaraan iyo waynaanba. Isla markiina waxaa run ah in ilmahaasu garan karaan falsafaddaas, haddii si' habboon loogu dhigo.

Hantiwadaaggu, waa mid in badan uu ka maqlo bulshada dhexdeeda. Xaqiiqadaasuna waxay hawl yaraynaysaa in ardaygaa yar la jeclaysiiyo nadariyadaan (aragtidaan).

Waxaa ina ku taageeraaya in la garto falsafadda hawl iyo hantiwadaag isagoo la tusi karo in ay jiraan hanti asaas ah oo bani-aadanka ka dhaxaysa sida dhulka, dhirta, biyaha, badda, kalluunka, qorroxda iwm. Kukaasoo dhami waa loo isticmaali karaa in lagu muujiyo fikradda hantiwadaag ah. Isla markii iyadoo la tusaayo iskaashiga iyo wada shaqeynta bulsha kasta ay kaga shaqaysato hantidaas labada leeyahay sida dhulka, dhirta, badda, baa miro iyo faa'iidooyin koreeya lagaga heli karaa hantida la wada leeyahay.

## Ujeeddada Dersiga

Waxay ujeeddada dersiga noqonaysaa in ardaygu fahmo hantiwadaagga inuu yahay nidaam dawladeed oo doonaaya :

1. In Soomaalidu wada noolaato.
2. Soomaaliyi wax wada yeelato sida dhulka, badda, daaqa iyo biyahaba ay hadda u wada leeyahay.
3. Soomaalidu wada shaqaysato.
4. Soomaalidu wax wada qaybsato.

**Qalabka Casharka :**

Dhul, geed, sawir, bad, ceel, isbitaal, dugsi, sawir dad wada shaqaynaya, calanka, masaggo, bariis, caano, biyo gudin, iyo wixii la mid ah, sawirro gaadiid-baabuur, awr, faras, dameer dooni iwm.

**Bilawga Darsiga**

1. Tus ardayda calanka Soomaaliyeed. Marka waydii:
   a) Kanu waa maxay? Waa calankeenni.
   b) Anagu waa ayu? Waa Soomaali.
   c) Ma jeceshahay Soomaalida? Haa.
   d) Waayo? Waa walaalahay.

**Bandhigga Darsiga**

A) Waydii ardayda su'aalaha, caawina inay jawaab sax ah ka baxshaan mid kasta :
   1. Inagu dhul ma leenahay? Haa.
   2. Dhulkeenna magaciis ? Soomaaliya (ku qor Soomaaliya sabuuradda).
   3. Maxaynu dhulka ku falaynaa? (waa ku noolnahay).
   4. Maxaynu ka helnaa? Waxa lagu noolaadoo dhan.
   5. Maxaa ka mid ah waxa lagu noolaado? Cuntada biyaha, dharka, guryaha, iyo waxyaabo kale. U oggolow ardaydu sida ayagu ay ku keenaan waxyaabaha lagu nool yahay oo dhan. Kuwan iyo kuwa kaleba sida gaadiidka qalabka iwm.
   6. Soomaaliya ma qaar baan u baahnayn inay (a) noolaadaan? (b) biyo iyo cunta helaan? (t) dhar helaan? (d) guri yeeshaan? (x) gaadiid helaan? (j) qalab iyo weel heleen? Jawaab mar walba waa maya.

**Xusuus :**

Shay kasta aad sheegtid tus isago naftiisa ama sawirkiisa ardada. Tallaabadan A ujeeddadeedu waxaa weeye in ardaygu fahmo waxa lagu noolaan karo. Tallaabadan B ee soo socota waa in ardayga lagu garan siiyo in qofka Soomaali jeceli uu yahay ka raba in Soomaaliyi wada noolaato. Kan taas rabaana inuu yahay kan hantiwadaagga jecel, waayo hantiwadaaggu wuxuu rabaa in ay Soomaalidu wada noolaato.

B) 1. **U sheeg ardayda** (a) in qofka Soomaali wada jeceli u doonaayo in Soomaalidu wada noolaato. (b) In mabda'a hawl iyo hantiwadaaggu u rabo in Soomaalidu wada noolaato.

2. Marka su'aal ardayda.

a) Ma qofka Soomaali wada jecel baa oggolaadaa hantiwadaag mise qofka raba in Soomaali qaarkood neceb? Kan wada jecel.

b) Qofka Soomaaliyeed ee neceb in Soomaali cunto ama biyo wada hesho maa hantiwadaag baa? Maya.

Tillaabada (T) waxaa la rabaa in ardayda la garan siiyo Soomaaliya; dhulka, carrada, badda iwm.

T) **Ardayda** su'aalahaan soo socda waydii, horkacna si aad uga heshid jawaabaha saxa ah. Kuwaasuna waxay noqon karaan kuwa aanu su'aal walba ka jawaabnay.

1. Haddii ceelasha biyaha dadka in yari wada leedahay Soomaalidu ma wada noolaan kari lahayd? Jawaab Maya.
2. Haddii dhirta miraheedu, xaabadeeda, ooddeeda mayraxdeed, iyo caleenteeda dad yari iska leeyahay Soomaalidu ma wada noolaan kari lahayd? Maya.
3. Haddii daaqa dhulka ka baxa dad yar xoolahood wada yeeshaan Soomaalidu ma wada noolaan kari lahayd? Maya.
4. Haddii miraha beeraha ka soo baxa in yari uun

cunto. Soomaalidu ma wada noolaan kari lahayd? Maya.

5. Haddii dadka xeebaha deggan qaar loo diido inay kalluunsadaan daw miyay ahaan lahayd? Maya.
6. Haddii dadka webiyaasha deggani webiga wax ku wada beertaan daw ma tahay? Haa.

Marka u sheeg ardayda in hantiwadaaggu doonaayo in dadku wada yeeshaan dhulka, dhirta, daaqa, ceelasha, webiyaasha, badaha iyo wixii ka soo baxa.

J) 1. Waa tallaabada la doonaaya in ardayda la fahamsiiyo in (a)nolosha fiican dadku ku heli karo wada shaqayn iyo hantiwadaag. (b) Qofka shaqeeya yahay ka wax anfaca.

2. Su'aalaha markaad waydiisid uga fur inay wada fahmaan jawaabaha.

   a) Ma fadhi baa lagu helaa miraha beeraha? Maya — Shaqo.

   b) Maxaa la yiraahdaa dadka wax inoo beera? Beeralay.

   t) Haddii aynu niri aynu dhulka wada yeelanno, ma qaarkeen bay tahay in ay ka shaqeeyaan? Inteenna kalena miyaynu ag fariisanaa? Maya. Waa in aynu wada shaqaynaa. U sheeg ardayda.

   x) Hantiwadaaggu wuxuu doonaya in (a) in la wada shaqeeyo (b) wixii soo baxana la wada qaybsado.

3. Beeshu ma inay xoolaha ka wada shaqaystaan baa mise qaarna xoolay dhaqaan qaarna waa iska seexdaan? Waa inay ka wada shaqaystaan.
4. Ceelasha haddii la wada leeyahaya saw in la wada qoto ma aha? Haa.
5. Kalluunka haddii la wada leeyahay sow in laga wada shaqaysto ma aha? Haa.
6. Markee baa beerta laga heli karaa wax badan? Marka qof qurihiba beertiisa yar ka shaqeeyo? Mise marka dad badani beerahooda isku darsadaan oo ka wada shaqeeyaan? Mar-

ka dad badan beerahooda isku darsadaan oo ka wada shaqeeyaan. Markaa horumarkeennu sow kuma jiro wada shaqaynteenna? Haa.

7. U sheeg ardayda in hantiwadaaggu jecel yahay in iskaashi dhulka lagu beerto, xoolaha lagu dhaqdo ceelasha lagu qoto kalluunsiga lagaga shaqaysto, warshadaha lagu wada yeesha.
8. Yay kula tahay in hatiwadaaggu doonayo in ay yeeshaan beeraha, xoolaha warshadaha iyo kalluunka? Soomaalida oo dhami inay wada yeelato kana wada shaqaysato.
9. U sheeg in hantiwadaaggu doonaayo in bulshada Soomaaliyeed in qof walba (a) Ka mid noqdo iskaashato meel ka shaqaysata (b) wax ku yeesho miraha ka soo baxa meeshaa.

**Ururinta Casharka**

Dawladdeenna hantiwadaagga ahi ee kacaanka ahi waxay doonaysaa :-

1. In dadka Soomaaliyeed wada noolaado.
2. In dadka Soomaaliyeed wada yeeshaan dhulka, beeraha, xoolaha, dhirta, daaqa, biyaha iyo badda.
3. In dadka Soomaaliyeed giddi wada shaqaystaan.
4. In dadka Soomaaliyeed iskaashatooyin samaystaan.
5. In dadka iskaashatooyinka ku jira wada qaybsadaan waxay soo saaraan. Marka anigu hantiwadaagga waa jecelahay ee idinku ardayahay ma jeceshihiin ? Maxaadse u jeceshihiin?

X) U dir ardayda inay soo waraystaan waalidkood iyo dad kaleba, haddii waxyaabahaan soo socda ku fiican yihiin in :
   a) qof qurihii ka shaqeeyo;
   b) dad badani ka wada shaqeeyaan i) Ceel ii) Beer iii) kalluunsi iv) xoola dhaqasho v) Reer-ood vi) Warshad vii) la dirirka cadawgeenna viii) joojinta biyaha webiga.

Ardaydu qaybtaa dibadda haka qabteen, waqtina, ha ku soo qaateen. Markay keenaanna dood ka fur.

## Casharka 5aad

# K A C A A N K A

**Tusaale Guud :**

Ujeeddada casharkani waxaa weeye in ardaygu fahmo nidaamka cusub ee doonaya in Soomaaliya loo beddelo barwaaqo. Nidaamka cusubi waa Kacaanka Hantiwadaagga ah. Kacaanka Hantiwadaagga ahi waa niyad iyo fikrad u halgamaysa inay hirgeliso waxyaalo badan oo ay beeshu u baahan tahay. Waxaa la rabaa in niyaddaas ardayga la taabsiiyo oo la garansiiyo. Sida loo taabsiin karana waxay ku xiran tahay macallinka. Macallinku wuxuu yaqaan waxa uu ardaygu garan karo iyo sida loo garansiin karo. Waxaa ardayga la garansiin karaa :

1. In marka hore isbeddel runtii dhacay;
2. In isbeddelkaan loo baahan yahay;
3. In isbeddelkaasi dawo u noqday dhibaatooyin uu ardaygu garan karo.

Wajiya kale oo ay tahay in ardaygu fahmo waxay tahay, inuu garto cidda wadda isbeddelka. Kaasoo ah nidaamkii kacaanka ahaa ee aburmay 21ka Oktoobar, 1969, ka dib. Waxaa run ah inay adag tahay in la fahmsiiyo darsigaan ilmo 6—8 jir ah. Ereyada «Nidaam» iyo «Kacaan» 21kaa Oktoobar iwm. baa ku adag ilmaha. Hase yeeshee, hawsha macallinka waxaa weeye inuu dhibaatadaas ka adkaado, muraadkiisana uu gaaro. Muraadkiisu waxaa weeye in ilmuhu gartaan darsiga. Macnaha isbeddelka waxaa loo tusi karaa :

1. In dawlad xumi (niman xun oo wax xukuma) jirtay intii ka horraysey 1969, iyo
2. in la tuso ilmaha wax cusub oo kacaanku sameeyey waqtigaas ka dib. Waxaa la oran karaa dadka shaqeeyaa waa yaraayeen, isbitaalladu waa yaraayeen, dugsiyadu waa yaraayeen, macallimiintu waa yarayd,

ardaydu waa yarayd, **wax kasta, inta badan, waa ya-raayeen**, waana xumaa**yeen.**

1969 ka dib dawlad fiican oo **kacaan ah baa timid.** Sidaas daraaddeed, shaqadii waa kororfay, **shaqaalihii** waa kordheen, isbitaalladii, dugsiyadii, beerihii, warshadihii, ayaguna, waa siyaadeen. Isbeddelku waa sidaas. Kacaanku waa sidaas. Hantiwadaaggu waa sidaas. Kacaanka Hantiwadaagga ahi waa isbeddel, waa korid degdeg ah. Waa wax badan; **waa** wax buuxa.

**Ujeeddada Casharka :**

1. In kacaanku yahay :
   b) Isbeddel weyn;
   t) Horumar.
2. In kacaan u dhashay Soomaaliya Oktoobar 1969dii.
3. In ardaygu u yeesho shucuur fiican nidaamkeenna cusub.

**Qalabka loo isticmaalayo Casharka :**

Tabaashiir, sawiro ah warshad cusub, deked cusub, beero cusub, dugsiyo cusub, jidad cusub iwm.

**Hordhaca Casharka**

Su'aal ardayda su'aalahan :
1. Hantiwadaag wuxuu rabaa in dadku wada dhergaane ma necebtihiin? Maya:
2. In dadku caafimaad wada helaan ma jeceshahay? Haa.
3. Hantiwadaagga ma jeceshay? Haa.
4. Hantiwadaagga ma waxaa keenay kacaanka 21kii Oktoobar mase xukunkii ka horreeyey? Kacaankii 21kii Oktoobar.

**Bandhigga Casharka**

1. Golaha Sare ee Kacaanka iyo Dawladdeenna cusubi Oktoobar 1965 ma jireen? **Maya.**
2. Goormay dhasheen? 21kii Oktoobar 1969.
3. Madaxweynaheennii 1968 kee buu ahaa? Dr. Cabdirashiid Cali Sharmaarke.
4. Yaa beddelay oo inoo ah madaxweynaha imminka? Jaalle Siyaad.
5. Intii Jaalle Siyaad Madaxweyne inoo ahaa, dadkii shaqayn jiray ma bateen? Haa.
6. Ma jiraan meel cusub oo dadku imminka shaqa ka helo? Haa.
7. Sheeg qaar.
   Xusuusi sawirkoodna tus.
   a) Warshado cusub;
   b) Dariiqa weyn ee la dhisay amba la dhisaayo;
   t) Karaash borograamyada (Mashaariicda cuntada degdegga ah).
   x) Iskaashatooyinka Kalluunka, Beeraha, Dharka, dhuxusha iwm.
8. Marka, miyaan kacaanku keenin isbeddel dhaqaalaha ah?
9. Haa ku qor kacaan sabuuradda iyadoo xuruuf waaweyn ah.
10. Dadkeenna maanta cunto helaa ma kordheen? Haa.
11. Dadkeenna maanta dharka helaa ma yaraadeen mise waa bateen? Waa bateen.
12. Xoolo shisheeye qaadan jiray Ummadda Soomaaliyeed ma yeelatay (U sheeg baananka, batroolka iwm.).
13. Marka isbeddelkii dawladdu ee Jaalle Siyaad dhaqaalaheenna ma beddalay? Haa.
14. Isbeddelkaa dhaqaaluhu ma fiican yahay mise waa xun yahay? Waa fiican yahay.
15. Marka isbeddelka dhaqaale ee fiicani ma horumar baa mise waa dib u dhac? Horumar.
16. Erayga Horumar ku daba qor isbeddel.
    a) Sharax isbeddel haddii loo baahdo.
17. Haddii Cali lacag badan helo dhaqaalahiisa ma :

a) hoos ayuu u dhacay?
b) hore ma u maray?
Marka hore waydii arday Cali la yiraahdo inuu is-
18. Sheeg labada weero tan sax ah :
taago.
dhacay.
19. Haddii dhaqaalaha dalkeennu kordho ma isbeddel horumar ahi baa ku dhacay? Haa.
20. U sheeg ardayda in dawladda dhaqaalaha dadka si fiican u horumarisaa la yiraahdo dawlad kacaan.
a) Cali dhaqaalihiisii hoos ayuu u dhacay.
21. Dawladdeenna kacaanka ahi, dhaqaalaha si fiican ma u beddeshey? Haa.
a) Waxaa kacaan ah dawladda caafimaadka dadka si fiican u beddesha.
b) Isbitaalladeennii ma bateen intii ka dambaysay 21kii Oktoobar 1969? Haa.
t) Faqiirku ma geli jiray isbitaallada fiicfiican hadduu bukoodo 21kii Oktoobar 1969 horeed? Maya. U sheeg ardayda in lacag laga bixin jiray isbitaallada.
j) U sheeg dawladda cusubi inay jebisay daawadii.
x) Mar haddii isbitaalkii bilaash yahay daawadiina ay jaban tahay, caafimaadku ma hormaray? Haa.
b) Cali dhaqaalihiisii isbeddel horumar ah baa ku Haa.

**Xusuus :**

1. Tus sawirro isbitaallo iyo disbenseriyo cusub oo la dhisay.
2. Ardayda ha masileen nin faqiira oo :
   i) 21kii Oktoobar hortii isbitaal laga eryaayo calashaan lacag buuna haysan. Markaas isbitaalka buu hortiisa ku dhintay.
   ii) Lacag baacsanaayo farmaasiye waayo lacag yar buu sitay. Markaas buu ku calaacalyaa farmasiga hortiisa.

1. Intii Siyaad Madaxweyne inoo noqday dadka wax qoraa ma bateen? Haa.
2. Intiinee baa hooyooyinkood farta barteen?
3. Intiinee baa aabbeyaashood farta barteen intii af Soomaaliga la qoray?
4. Madaxweynahee baa xukumay in af Soomaaliga la qoro? J. Siyaad.
5. Afka hooyo oo la qoray ma fiican yahay? Haa. Waayo? Ha ka jawaabto.
6. Madaxweynahee baa yiri reer miyiga wax ha la baro? J. Siyaad.
7. Intii ka dambaysay 21kii Oktoobar dugsiyadu ma bateen mise waa yaraadeen? Waa bateen.
8. Yaa ii sheegaaya dugsi inoo dhow oo la dhisay intii ka dambaysay 1969?
9. Marka waxbarashadu hore ma u martay intii 21kii Oktoobar 1969 ka dambaysay? Haa.

U sheeg ardayda in is beddelka waxbarashada ku dhacay ee dhaqsaha ah u yahay kacaan.

j) Marka waa maxay kacaanku? U sheeg ardayda kacaanku inuu yahay horumar dhaqaale caafimaad iyo waxbarasho dhaqso ah.

x) 1. Yaa keeni kara horumarka dalkeenna si dhaqsa dawlad horumarkeenna ka shaqaynaysa mise mid horumarkeenna neceb? Mid horumakeenna jecel.
2. Dawladdii inoo dhalatay 21kii Oktoobar 1969 ma si dhaqso ah bay horumakeenna wax uga qabatay? Haa.
3. Marka dawladdanu dawlad kacaan ah ma tahay? Haa.
4. U sheeg inay dawld kacaan tahay; waayo waxay doonaysaa in dhaqaalaha, caafimaadka iyo waxbarashada Soomaaliyeed si dhaqso ah u dhismaan.
5: Maxaad u jeceshahay Jaalle Siyaad? Horkac ardayda si ay u helaan jawaabta.

**Ururinta Casharka**

1. Kacaanku waxaa weeye isbeddelka iyo horumarka dalka.
2. Waa dhaqaale, caafimaad iyo waxbarasho dhaqso u kordhay.
3. Kacaanka dalka waxaa dhasha dad kacaan ah.
4. 21kii Oktoobar 1969 waxaa noo dhashay dawlad kacaan ah.
5. Jaalle Siyaad iyo Jaallayaashiisa GSK waa kacaan.
6. Annagu waa jecelnahay Jaalle Siyaad iyo Jaallayaashiisa G.S.K.
7. Annagu waxaan nahay kacaan.
8. Dalkeennu waa kacaan, dadkeennu waa kacaan.

Casharka 6aad

## ANNAGU MUSLIM BAAN NAHAY

**Tusaale Guud :**

Ardaygu wuxuu soo qaatay casharrada : **Calanka, Magaaladayda, Soomaaliya Hantiwadaag iyo Kacnaaka Oktoobar.** Ujeeddada laga lahaa casharradaas waxay ahayd in ardaygu yeesha shucuur (dareen dal jacayl) waddani ah oo kacaan ah, in ilmuhu yeeshaan qowmiyad ay isku soo soocaan oo ay ku abtirsadaan, Ummaddooda Soomaaliya, iyo kacaankooda hantiwadaagga ah, marka ay waxaasoo dhami ka mid noqdaan garashadooda iyo dareenkooda (shucuurtooda) oo ay noqdaan wax ayaga ka mid ah oo aan la kala saari karin.

Caqiidada islaamkuna waa ka sii qota dheer tahay oo casharradii hore ayay sii xoojinaysaa ujeeddadooduna waa isku mid : da' ama fac waddani ah oo qowmi ah. kuwa jecel calankooda, waddankooda Soomaaliyaa, Kacaankooda Hantiwadaagga ah oo dul iyo caqiida leh.

Bedagoojiyada waxbarashada Hantiwadaagga ah ee dalkeenna waxay taabanaysaa dhinac kasta oo ay ilmuhu ka korayaan, ama ka dhismayaan : jirka, caadifada, caqliga, iyo ruuxa.

Cashar kasta oo aan bixinayno waa inuu dhinacyadaasoo dhan ama mid ka mid ah taabtaa ama wax ka taraa. Casharkaan **(Annagu muslim baan nahay)** wuxuu wax ka tarayaa, gaar ahaan, xagga ruuxa iyo caadifada, guud ahaanna waxaa weeye darsi farta ku fiiqaya rukun ka mid ah rukumada waaweyn ee ay ku dhisan tahay qowmiyaddeennu Soomaaliyeed, waana darsi qofka qalbi sami iyo raxmad ku beeraya.

Sidaas daraaddeed, marka aan ilmaha ka korinaynno dhinaca ruuxa iyo caadifadda ama aan ku talaalayno qiyam, akhlaaq, waxaa waajib ah inaan u sii maro oo ka soo gallo

xagga dhaqankiisa, waxa dhaqankiisu u yaqaan xumaanta iyo wuxuu u yaqaan samaanta, waxa ay u yaqaaniin xalaasha, iyo waxa ay u yaqaaniin xaraanta. Qiyamkaas waxaa laga heli karaa dhaqanka ilmaha ee islaamka ah. Inta islaamku u yaqaan wanaagga ayaa hantiwadaagguna u yaqaan, oo laga helaa.

Islaamku wuxuu diidaa beenta, khayaanada, tuugada, caajiska, munaafaqnimada, xanta. Afminshaarnimada, dulmiga, dhaca, iimaan la'aanta, dilka aan xaqa ahayn iyo wax kasta oo beesha dhib u keena.

Hantiwadaagguna intaasoo dhan waa diiddaa. Xumahaas oo dhan waa in ilmaha laga gooyaa maskaxdooda iyo carrabkooda oo la baraa xumaan inay yihiin, baddalkooda wanaagga ahna la baraa. Waxaa lagu bari karaa islaamka iyo hantiwadaagga labada. Ka faa'iidayso si ilmuhu u yeeshaan tarbiyad qof dhan oo wax tar leh. Hadafkeennu waxaa weeye, wax kastoo wanaagsana inaan ku abuurro ilmaha, wax kastoo xunna ka reebno. Marka aad sidaas u kulmisid diinta iyo hantiwadaagga, waxaad asaas u dhigaysaa in limuhu marka ay weynaadaan ay gaaraan heer ay ku garan karaan in Diinta iyo Hantiwadaaggu ayan isdiidanayn oo ayan iska hor imaan karin haaddii aan la iska horkeenin.

**Ujeeddada Casharka**

1. In ilmaha lagu tallaalo caqiidada islaamka;
2. In la baro akhlaaqda wanaagsan, runta, waddaninimada, shaqada, sinnaanta, geesinnimada, aamminnimada iwm.
3. In aan la iska horkeenin Diinta iyo Hantiwadaagga.

**Bandhigga Casharka**

Marka aad casharkan dhigaysid, waxaa habboon inaad kaalmaysatid macallinka Diinta iyo Carabiga oo xoogga saar xagga ruuxa, caadifadda, iyo akhlaaqda waddaniga ah iyo kacaamaynta ahklaaqda islaamka ah.

**Qalabka la isticmaalayo :**

1. Kitaab Qur'aan ah.
2. Masawir maasaajid.
3. Sawirka Kacbada.
4. Tabaashiir midab leh iyo wixii kale oo aad garatid inay ku kaalmayn karaan.

**Tillaabada 1aad : Su'aalo**

1. Kor u qaad kitaabka qur'aanka ah. Waydii : kani waa maxay? Qur'aan.
2. Ma dhigtaa Qur'aanka? Haa.
3. Waydii inuu suurad akhriyo.
4. Waydii : xagge ka barataa? Dugsiga Qur'aanka, ama dugsiga.
5. Qur'aanka yaa soo dejiyey? Ilaah. U sheeg in Qur'aanku yahay hadalkii Ilaaheen.
6. Waydii : Allaheen, waa kee? Waa Alle.
   Dheh : Alle waa mid. Ilaah kale ma jiro. Aad ugu nuuxnuuxso.
7. Qur'aanka yaa Alle inoo ku soo dhiibay? Jawaab, Nabi Maxamed.
8. Nabigeennu waa kee? Waa Nabi Maxamed.
9. Nabi Maxamed Diintuu noo keenay waa tee? Waa Islaam.
10. Haddaba ilmaha ku soo celi :
    — Allaheen waa kee? Waa Alle.
    Alle kale ma jiro. Allaheen waa mid .
11. Nabigeennu waa kee? Maxamed.
12. Diinteennu waa tee? Waa Islaam.
13. Maxay ina faraysaa? Sheeg waxay farayso.
14. Maxay naga reebaysaa? Sheeg waxay naga reebayso.
15. Haddii aad muslim tahay maxaa kugu waajib ah? U akhri oo u sharax waxyaalaha waajibka ah. Liisto ku qoro waxyaalaha xun iyo waxa san isugu lamaani sida : waydii, yaa fiican : runta iyo beenta?

Daacadnimada iyo khayaanada? Tuugada iyo ammaanka, nadaafadda iyo wasaqda? Shaqada iyo caajiska? Samirka iyo samir la'aanta? Dulqaadka iyo raragubyada? (Dulqaad la'aanta)? Geesinimada iyo fulaynimada? Waddan jacaylka iyo waddan nacaybka? Hantiwadaag iyo Hantigoosadka? Iskaa wax u qabso iyo Iska fadhi? U sheeg, haddii aad muslim tahay waxyaalaha fiican oo dhan waa la jecel yahay, waxyaalaha xunna waa la naceyb yahay .

Ereyada iyo macnaha aad doonaysid in ilmuhu qaataan ku celceli. Su'aal kasta jawaabteeda sharax.

**Uruurinta Casharaka**

U akhri ilmaha hadalka soo socda :
Annagu muslim baan nahay.
Allahayo waa Alle. Alle kale ma jiro.
Haddaan shaqaysanno oo aan akhlaaqda
Islaamka raacno waa guulaysanaynaa
Annagu muslim baan nahaya
Allaheen waa Alle Nabigeen waa Maxamed
Soomaaliya waa Islaam
Dalkeennu waa Islaam
Annagu muslim baan nahay.
Annagu Hantiwadaag baan nahay
Inta xun waa ka fogaannaa
Hantiwadaagga iyo Islaamka waa diidaan
Waxa xun sidaa beenta, cayda,
tuugada, caajiska, wasakhda, fulaynimada iyo
wax kastoo xun.
Waxaan jecelnahay runta, shaqada, nadaafadda, nabadda,
Soomaaliya, Hantiwadaagga, Iskaa Wax U Qabso.

**Tillaabada 3aad : Hees**

Dooro hees ku saabsan Islaamka.
Allaheen waa alle, nabigeen waa Maxamed

Ardaydoo dhani ha ku wada heeseen.
Heestaas iyo darsigaani ha isla socdeen.

## Tillaabada 4aad : Shaqada Guriga

1. U dir ardayda ha ka soo sheekeeyaan waxyaabaha fiican ee Islaamku uu rabo, iyo waxyaabaha xun uu diido. Liisto ha ku soo qoreen.
2. U dir ardayda ha ka soo sheekeeyeen Nabigeenna Naxariis Eebbe ha siiyee.
3. U dir inay soo arkaan masaajidka magaalada iyo sida loogu tukanayo. U sheeg in salaaddu ay fiican tahay.

Casharka 7aad

# SHAQADA IYO SHAQAALAHA

**Tusaale Guud :**

**«Shaqada iyo Shaqaalaha ayaan ku nool nahay»**

Casharkani wuxuu ku saabsan yahaya shaqada iyo shaqaalaha. Xusuuso waligaa, waxaan rabbaynaynaa ilmo aan doonayno inay ka mid noqdaan oo u shaqeeyaan ummad Hantiwadaag ah. Ummaddoodu waxaa weeye mid aamminsan shaqada iyo shaqaalaheeda, iyo shaqaalaha dunida oo dhan. Waa mid qofka ugu fiicani yahay qofka ugu shaqada badan, uguna shaqo wacan. Ummad ay ku jirto ruux shaqaalenimo. Carruurteenna maanta waa kuwii dhaxli lahaa dalka berri, waxaa waajib ah in lagu beero waddaninimo, hawl karnimo xilkasnimo iyo wax kastoo fiican. Sidaas darteed, casharkan waxaa laga rabaa inuu ilmaha jeclaysiiyo shaqada iyo shaqaalaha.

**Ujeeddada Casharka**

1. In ilmaha la baro in shaqadu abuurto, nolosha beesha.
2. In la jecleysiiyo ilmaha shaqada iyo shaqaalaha.
3. In Shaqadu tahay waajib Islaamku ina faray.

**Qalabka la isticmaalayo :**

1. Sawir beeraleey
2. » kalluumaysato
3. » dad shaqaale ah
4. » Iskaa Wax U Qabso
5. » Xoolo lagula joogo beer iyo iwm.

1. U saar ardayda dibadda oo gee meel beer ah; ama xoolo joogaan ama wax laga dhisaayo.
2. Su'aal ardayda :
   i) Halkanu waa maxay? Jawaab masalan — waa beer.
   ii) Maxaa beeraha ka baxa? Cunto, iwm. sheeg waxaad ka cuntid ha magacaabo, bariis, ha,-ruur, moos iwm.
   iii) Waxa beeraha ka baxa ma huwataa? «Haa) xusuusi cudbiga iyo dharka.
   iv) Maxaa la yiraahdaa. shaqaalaha beeraha? «Beeraleey».
   v) Beeraladu waxtar ma inoo leedahay? «Haa».
   vi) Waayo? Cunto iyo dhar bay inoo soo saaraan.
   vi) Ma jeceshahay beeralayda? Haa.
   vii) Yaa kale oo cunto inoo soo saara? Xoolalayda iyo kalluunlayda? (Tus xoolalay, kalluunlay ama waxay soo raaraan).
   viii) Ma jeceshahay xoolalayda iyo kalluunlayda? Haa.
   ix) Maxaad u jeceshahay shaqaalaha beeraha, xoolaha iyo kalluunka? Cuntadaa aan ku noolnahay iyo dharka iyo kabahaanu qaadanno bay noo soo saaraan.
   x) Ma jiraan shaqaale kale oo aad jeceshahay? Baruhu waa inuu hoggaanshaa ardayda si ay u sheegaan : -
   Kuwa wax dhisa, ka shaqeeya warshadaha, biyaha, dugsiyada, isbitaallada, nabad gelyada dalka, gaadiidka, isgaarsiinta, nalka magaalada, makhaayadaha, dukaannada, dekedaha
   xi) Ha sheego mid walba inuu jecel yahay iyo wuxuu u jecel yahay?
   x) Ardaydu waa in loo kala qaybshaa kooxo dhawr ah. Kuwaasu waa inay soo kala siyaartaan kana soo warramaan sawirrana ka keenaan hadday kari karaan shaqooyinka kala

gaarka ee bulshadoodu ku nooshahay.

xiv) Ardayda marka waydii in qolo walba (a) shaqadood waxtar leedahaya (b) in la jeclaado wixii shaqada qabta.

xv) Ii sheeg wax fiican aad cuntid, huwatid, seexatid, fuushid, wax ku raratid, habeenkii wax ku akhrisatid oo aan shaqaale samayn. Jawaab ma jiro.

xvi) Marka waxa ku fiican nolosheenna shaqaalaha ayaa soo saara.

**Xusuus :**

Halkaa marka uu fasalku maraayo waa lagama maarmaan in la geeyo meesha hawlahaasu ka soconayaan. Darsigan waa in lagu qaataa waqti badan ardayguna magaalada ku tegi karaa kana soo warrami karaa meel kastoo shaqaale ka shaqeeyo oo magaaladiisa ama tuuladiisa ah.

**Ururinta Casharka**

Waxaa dhisay dunida dadka shaqeeya. Cuntadeenna iyo waxa dharkeenna laga sameeya waxaa soo saara dadka beeraha leh iyo kuwa xoolaha dhaqa. Guriyaheenna waxaa dhisa dadka farsama yaqaanka ah sida fuundiga, nijaarka, birmaalka. Alaabta aynu guryaha dhiganno waxaa ka mid ah sariirtaha, kuraasida, gogosha, weelka, mindiyaha iyo fandhaalada. Giddigood shaqaale baa sameeyey Xafiisyada iyo dugsiga waxaynnu ku isticmaalnaa alaab fara badan. Waxaa ka mid ah kutub, buugag, qalmaan, warqado, makiinado, khad iyo waxyaaba kaloo badan. Dhammaan shaqaale baa sameeya. Waxyaabahaas aynnu soo sheegnay baa nolosheennu ku xiran tahay. Iyaga la'aantood ma noolaan karno. Kulligoodna shaqaale baa sameeyay. Marka haddaan shaqaale jirin ma noolaaneen. Marka shaqaale waa nolosheenna. Shaqaale waa fiican yahay. Shaqaale anigu waan jeclahay.

Adigu ardayahow ma jeceshahay? Haa.

## SHAQADA IYA SHAQAALAHA (Sheeko)

Liibaan oo wiilkiisa Samantar ah shaqa ku waaninaya, Samantaroo dugsiga dhammeeyey, Xalanene ka soo baxay, oo sannadkii Shaqada Qaranka u baxaya wuxuu yiri :

Liibaan : Samantarow

Samantar : Hee aabbe

Liibaan : Ii waran, waxbarashadaad dugsiga Xalane ugu jirteen ma idiin dhammaatay?

Samantar : Haa aabbe, waa noo soo dhammaatay, oo berrito waxa noo bilaabanaya sannadkii Shaqada Qaranka.

Liibaan : Weli, ma la idiin kala sheegay, meelahaad ka shaqaayn lahaydeen?

Samantar : Haa aabbe, anigu waxaan ka shaqayn doonaa dugsiga la yiraahdo Macallin Jaamac.

Liibaan : Dugsi fiican baa laguu beddelay, dugsigaasoo lagu magacaabay, Aw Jaamac Bilaal.

Samantar : Aabbe, aw Jaamaca muxuu ahaa?

Liibaan : Aw Jaamac wuxuu ahaa, geesi taariikh weyn dhulka Soomaaliyeed ku leh. Waa ninkii ugu horreeyey oo dugsi nidaam leh waddanka ka furay.

Samantar : Aabbe waan ku faraxsanahay, beddelaaddii la ii beddelay dugsiga Macallin Jaamac.

Liibaan : Maandhow Samantarow, aan ku waaniyee iga dhegeyso.

Samantar : Haye aabbe, haye aabbe, waa yahay.

Liibaan : Maandhow shaqada ha ka daalin, ha ka daahin, dib haw dhigan shaqo, dabeecad aad dadka kula dhaqantid yeelo. Dadka kaa waaweyn xurmay, waxa laguu diro ha diidin yeel, dadkaaga iyo dalkaagaba jeclaw. Madaxdaada dhawr oo ha la diririn.

Samantar : Haye aabbe, haye aabbe, waa yahay.

Liibaan : Maandhow, nimaan shaqaysani, sharaf ma leh, Maandhow niman shaqaysani cudur ma waayo. Shaqadaa lagu hormaraaye, shaqada ku dadaal; maandhow, nin hurdaa ma hodmo ee hawlkar no-

qo; maandhow, shaqadu waa barwaaqo ee, shaqada ogoow, ogoow, ogoow.

Samantar : Haye aabbe, haye aabbe waan yeelayaa waanadaada ee iga wardhawr.

Liibaan : Maandhow guulayste, waanadayda ha ilaawin.

Samantar : Ilaawimaayo aabbe, waxaan rumaysanahay in uu shaqaaluhu yahaya laf dhabartii dhulka. Sida Siyaad yiri : Hadal yar iyo hawl badan iyo hanuunsanaan baa lagu hormaraa. Weligayna ilaawimaayo waanadaada iyo waanada Siyaadba.

## Casharka 8aad

## (ISKAA WAX U QABSO)

**Tusaale Guud :**

Iskaa wax u qabso waa casharka ugu adag uguna muhimsan ee la rabo in ilmaha la baro. Waxaa waajib ah in casharkan ilmaha loo baro sida caqiidada loona aamminsiiyo, maxaa jira iskaa wax u qabso waa mabda'a aan ku dhisayno beel hantiwadaag ah Dalkeenna Soomaaliya. Waa fikrad wixii ummadi ay doonto ku abuuran karto .... waa tabar ama xoog aan ku heli karro wixii aan u baahanno, oo aan kaga kaaftoomayno isku hallayn shisheeye.

Iskaa wax u qabso waxay naga xorraysay wahsigii, waayo sugiddii iyo is-aammin la'aantii, muddo aan ku soo noolayn. Iskaa wax u qabso waa mabda'a is aqoonsiga uu qof is aqoonsado, wax tarkiisa iyo inuu yahay sidii **kaabad** beesha meel ka haysa; ummadina ay aqoonsato awooddeeda aan dhammaan karin. Fikraddaasi waxay ku fadhidaa dhuuxa mabda'a hantiwadaagga ah.

Mabda'a kacaankeenna hantiwadaagga ah.

Fikradaasoo kale sidee baad u aamminsiinaysaa carruur yaryar ah? Sidee baad u baraysaa ilmo aan wali korin? Da'daasoo kale waxaa lama huraan ah in loo laqino runta (xaqaa'iqa) dhuuxa ah ee ku jirta fikradaas, runta la rabo in la baro ilmaha oo la aamminsiiyo. Haddaba waxaa waajib ah in macallinku uruuriyo ereyadaa iyo hadallada asaasiga ah ee runta ah ee la rabo in ilmaha carrabka loogu tiro; iyo in la tuso wixii aan iskaa wax u qabso ku qabsannay oo ilmaha laftoodu indhahooda ku arkaan.

Waxa laga qabtay magaaladooda, tusi xoogga Iskaa Wax U Qabso meelaha ay markaas ka socoto Iskaa Wax U Qabso, shaqadu ka socoto. Dariiqada saddexaad oo lagu fahamsiin karaa waxaa weeye ayadoo ardayda loo wado meel Iskaa Wax U Qabso looga shaqaynayo oo ay ayagu ka qayb galaan shaqada. Waa in loo sameeyaa borogaraam ay iskaa wax u qabso

kaga shaqeeyaan dugsiga hareerihiisa iyo beesha.

**Ujeeddada Darsiga**

In la aamminsiiyo ilmaha Iskaa Wax U Qabso : awoodda Iskaa Wax U Qabso, fiiradiisa iyo ruuxiisa iyo ujeeddadiisa.

**Qalabka la isticmaalayo :**

Waxaa ka mid noqon karaa :

1. Masawir dad iskaa wax u qabso ku shaqaynayo.
2. Masawiro meelo iskaa wax u qabso lagu dhisayo.
3. Masawir dad shiraya oo wada tashanaya sidii ay wax u wada qabsan lahaayeen.
4. Shaqo iskaa wax u qabso ah oo ilmaha loo diro.

**Bandhigga Casharka**

Su'aalo :

1. Masawir hor dhig ardayda. Masawir Iskaa Wax U Qabso ee xaafaddooda laga qabtay. Waydii maxaa dadakaasi samaynayaan?
2. Waydii dadka ka shaqaynaya cidda ay yihiin.
3. Maxay dhisayeen? Dugsi, ama isbitaal, ama jid, xafiis iwm.
4. Waydii ardayda, yaa leh waxaa la dhisayo? Dadka.
5. Dadka iyo dawaladdu maxay kala yihiin? Waa isku mid.
6. Maxay taraan waxaas la dhisayaa? Dugsi? Waxbaan ku barannaa. Isbitaal? Daawo.
7. Masawir dad beer ka shaqaynaya. Waydii maxay qabanayaan dadkaasi? Beer bay ka shaqaynayaan.
8. Waydii maxaa beerta ka baxa? Masaggo, galleey, moos, qudaar, cudbi ... iwm.
9. Waydii maxay taraan waxaasi? Jawaab. waa cunnaa, amba wax dhar laga sameeyo.

10. Ma ka maarannaa? Maya.
11. Qof kaliya ma ka shaqayn karaa? Maya.
12. Qof kaliya iyo dad badan keebaa shaqo badan? Dad badan.
13. Sidoo kale xoolaha la wada dhaqdo, ceesha la wada qoto, dalka la wada daafaco, inay u faa'iido badan yihiin. U sharax dad badan oo wad shqeeya oo wax soo wada saara la wada leeyahay. Sida dugsiyada isbitaallada, jidadka, beeraha, (Karaash) iwm. Inay ka faa'iidooyin badan yihiin keli shaqaynta.
14. Masawirrada aad tusaysid ha ka mid noqdo madaxweynaha iyo madaxda kale ee dawladda oo Iskaa Wax U Qabso ku shaqaynaya iyo radayda.
15. U wad ardayda meel Iskaa Wax U Qabso looga shaqaynayo. Aayagu ha ka qayb galaan.

Su'aal kasta jawaabteeda u sharax ardayda. Su'aalahu waa si furayaan. Jawaabida jawaab bay furaysaa. Hubso inaad gaartay dantii aad lahayd. Su'aal kasta jawaabteeda saxa ah, u wada akhri ardayda, ugu celceli oo wada qaybsii.

## Ururinta Casharka

Iskaa Wax U Qabso waa mabda'a toosan. Waxaan ku dhisaynaa Dalkeenna, Soomaaliya. Waa fikrad aan ku heli karno wixii aan doonno. Waa mabda'a inaga xoraynaaya gaajo, baryo, shaqa la'aan, jahli, cudur. Wuxuu noo diidayaa isku hallayn aan cid kale isku hallaynno.

Wuxuu ina barayaa xooggeenna, iyo awooddeenna.

Iskaa Wax U Qabso waa shaqo
» » » sharaf
» » » xorriyo
» » » geesinimo
» » » walaalnimo
» » » deeqsinimo
» » » isjecayl
» » » isaammin
» » » xoog
» » » hantiwadaag, waa hadal yar, waa hawl badan, waa hanuunsanaan, waa midnimo, waa isku kalsooni.

Ereyadaas ardaydu ha qaybeen; kor ha ka qaybeen.

Casharka 9aad

# DISHIBILIINKA IYO USLUUBTA

## (Edebta iyo Anshaxa San)

**Tusaale Guud :**

Waxaan og nahay, haddii aan nahay barbaariyayaalka, in shaqada dugsigu u qaybsanto laba qaybood oo waawyen : **faafin cilmi** : iyo **faafin nidaam,** ama ku intifaaca cilmiga (runta) ama waayo-aragnimo la ururiyey disibiliinkuna waa weelkii lagu ururin lahaa oo uu ku joogsan lahaa cilmigu. Haddii weelkaasi daloolo wax ma celin karo, sidoo kale, haddii ilmuhu ayan disibliin lahayn cilmiga ma ceshan karo dalkana uuguma shaqayn karo. Sidaas daraaddeed dishibliinka iyo anshaxa ama usluubtu waa akhlaaq. Qof aan akhlaaq lahaynna kama faa'iidaysto **aqoonta.**

Qofku sidiisa waa qallafsan yahay oo waa dhib badan yahay, waana faduuli. Wuxuu doonaa amba rabaa inuu iddiis u dhaqdhaqaaqo: af, addin iyo gacan.

Haddii iddiis, siduu rabo loo siidaayo, wuxuu keeni karaa khasaaro weyn oo aan laga soo kaban karin. Qofna iiddiis ma gaari karo qof kale xisaabtii la'aanteeed. Waxaa qofku iddiis ku gaari karaa laguna kala amaan heli karaa dishibiliin, layli iyo anshax.

Haddaba, dishibiliinka iyo anshax (usluubtu) waa nolosha dadka, ammaankooda iyo horumarkooda.

Waxaan kaloo og nahay, gaar ahaa, baahida ay dugsiyadeennu u qabaan dishibiliin, 1969 ka hor, dalkeennu ma lahayn hadaf siyaasi ah. Natiija ahaan waxbarashadiisuna ma lahayn ujeeddo. Sidaas daraaddeed lama tixgelin jirin dishibiliinka, iyo guud ahaan barbaarinta da'da yaryar. Taasi waxay keentay kala dambayn la'aan ismaqal la'aan, iyo xeerkii

kaynta. Si xaalkaas looga baxo, waa waajib in dishibiliinka lagu daro manhajka waxbarashada.

Darsigaan waxaannu bixinnay dishibiliinka iyo usluubta. Dishibiliinka waxaan ula jeednaa wixii la xiriira qofnimada, anshaxa qofka, (lattitude and behaviour), dhaqdhaqaaqa qofka.

Labadoodu, dishibiliinka iyo anshaxa ma kala bixi karaan. Haddii qofka anshaxiisu xun yahay, qofkiisa, ayna barta dishibiliinka ma yeesho. Qofku haddii uusan dishibiliin ku soo barbaarin, ma yeesho garasho, sharci iyo dhadhan dishibiliin. Sidaas daraaddeed ma ixtiraamo dishibiliinka iyo sharciga mana yeesho anshax. Haddaba anshaxa iyo dishibiliinku waa laba kafadood oo isu dheliya oo aan kala maarmin.

Macallinka waxaa laga rabaa inuu labadaas dhinac ilmaha ka barbaariyo. Darsigaan ujeeddadiisu waxaa weeye inuu labadaas dhinac wax ka taro. Baridda ilmaha la barayo anshaxa (usluubta) iyo dishibiliinka maaha wax darsi iyo ka badan looga kaaftoomi karo ee waa shaqo waligeed iyo xisad kasta socota: dugsiga, guriga iyo dibaddaba.

Meelaha ilmaha lagu barayo anshaxa iyo dishibiliinka waxaa k mid ah : dugsiga, **guriga, iyo dibaddooda,** (suuqa). Dishibiliinku wuxuu si gaar ah u taabanaya dugsiga iyo suuqa (dibadda). Uga sheekee xeerka dugsiga lagu joogo, iyo xeerka lagu maro suuqa. Dishibiliinka dugsiga waa muhim maxaa jira (1) waa meel dawladeed, ardayguna halkaas ayuu ka qaataa fikradda dawladnimada, isxukunka iyo kala dambaynta; (2) waa mujtamiciiyoo dhan «dugsigu wuxuu kulmiyaa bulshadoo dhan) halkaasoo uu ka baranayo dad la dhaqan iyo bulshanimo; (3) waa meel dishibiliin la'aantu aan waxba laga faa'iidaysanayn. Inta badan dugsiga dibaddiisana waa sidoo kale dishibiiin iyo xeer lagu socduu u baahan yahay. Uga sheekee ardayga dishibiliinkaas.

Anshaxuse wuxuu la xiriira, sidii aan kor ku sheegnay, qofnimada, dhaqdhaqaaqa guud ee qofka. Uga sheekee ilmaha anshaxa wanaagsan : akhlaaqda, nadaafadda,, (nabigeennu

wuxuu yiri : nadaafaddu iimaanka waa ka bar, dad la socodka. Ugu sheekee sida ay guriga ku joogaan; shaqada guriga, nadaamka cuntada, huqaadka (dhar), xiriirka waalidka, walaalaha, dariska iwm.

Marka ilmaha la barayo dishibiliinka iyo usluubta waxaa jira dariiqo hore oo ay isticmaali jireen, waalidka iyo macallimiintuba dariiqada usha, iyo saddexda (c); **cayda, canaanta, iyo cayrinta.** Dariiqadaasi guul lagama gaarin. Sidaas daraaddeed waxaa hadda la arkay inay waajib tahay in la baddalo dariiqadaas gabawdey. Waxaa hubaal noqotay hadda in ardayda wax lagu bari karo si' ay ku dhafan tahay waalidnimo, raxmad, sabaale, waano, tusaale, faan, qosol, farxad iyo jaceyl. Sidaas ayaa ilmaha wax lagu bari karaa. Laakiin baqdin iyo sas qofna wax kuma baran karo. Dersigaani wuxuu kuugu qaybsami karaa laba darsi (dishibiliin iyo anshax) oo min labo xisadood ah.

**Hadafka darsiga :**

In ilmuhu yeesho oo lagu tallaalo dishibiliin iyo anshax ama usluub wanaagsan si' loo siiyo awood uu kula dhaqmo beesha ay ku dhex nool yihiin : ardayda, macallimiinta, waalidka, iyo dadwaynaha kale.

**Qalabka la isticmaalayo :**

— Sawir tilmaamaya carruur anshax fiican iyo kuwa anshax xun.
— Masawir dad xabbis ku jira.
— Tabaashiir midab leh.
— Buugaan laftiisa.

**Bandhigga Darsiga :**

Waydii ilmaha su'aalaha soo socda :

1. Dugsiga goormaad timaadaa? Jawaab : 7:00 sub.

3:00 gal. amba goorta dugsiga la bilaabo.

2. Qofkii soo daaha sidee yahay? Waa xun yahay.
3. Safka ma ka daahdaa? Maya.
4. Qofkii daaha waa sidee? Waa dabaal.
5. Ma fiican tahay in baruhu fasalka kaa hor galo? Maya.
6. Xisadda dhexdeeda ma ku hadashaa? Maya.
7. Ardaygii ku hadla muxuu yahay? Waa xun yahay.
8. Markee baad hadli kartaa? Markaad jawaab bixinaysid, ama aad wax su'aalaysid, ama aad wax akhrinaysid.
9. Yaa fiican : ilmihii xisadda ku qayliya iyo kii edeble? Kii edeble.
10. Dugsiga darbigiisa wax ma ku qortaa? Maya ama haa.
11. Kii ku qoraa waa sidee? Waa doqon, waa dabbaal.
12. Miisadaha iyo kuraasta ma xoqdaa?
13. Qofkii xoqa ama jajabiya muxuu yahay? Waa cadaw, waa doqon.
14. Dugsiga qashin (waraaqo) ma ku daadisaa?
15. Qofkii ku dhex daadshaa waa sidee? Asagaa qashin ah.
16. Tabaashiirta ma ku cayaartaa? Maya, kii ku cayaara waa sidee? Waa cadaw. Xoolaheennu cadow ku yahay. Mitaal.
17. Nadaafaddu ma fiican tahay? Haa.
18. Maxay ku fiican tahay? Caafimaad. Qurux.
19. Qofkii aan nadaafad lahayn waa sidee? Waa foolxun yahay. Waa soo uraa.
20. Dariiqa markaad goynaysid sidee yeeshaa? Geesahaan iska fiiriyaa.
21. Haddii nalka guduudani soo baxo? Waa istaagaa.
22. Haddii kan cagaarani soo baxana? Waa gooyaa.
23. Haddii qof kaa weyn jid ciriiriya kaaga hor yimaado sidee yeeshaa? Waa ka istaagaa.
24. Yaad la qadaysaa guriga? Waalidka walaalo.
25. Sidee u qadaysaa? Ka sheekee dariiqada wanaagsan ee loo qadeeyo.
26. Marka reerku hurdo ma ku qaylisaa? Maya.
27. Reerka shaqada ma la qabataa? Haa.

Su'aal kasta jawaabteed ardayda kala qaybgal. Hubso in ilmuhu wada maqleen oo wada garteen jawaabta saxa ah. Jawaabaha muhimka ah ku celceli. Su'aalaha kor ku qoran waad sii badin kartaa. Inta kor ku qoran waa miitaal. Darsiga guud ahaan waxaa u qaybin kartaa ilaa afar darsi, afar xisadood, maxaa jira waa muhim.

## Dishibiliinka iyo Usluubta

---

### B. Dishibiliinka (nidaamka)

Dishibiliinka waa nolosha dadka. Dishibiliinku qofkuu ilaaliyaa. Dishibiliinku waa lagama maarmaan. Wax kasta waxay leeyihiin dishibiliin ama nidaam ay ku socdaan. Dugsigu nidaam buu leeyahay. Nidaamkiisa waxa ka mid ah : -

1. In la dhawro waqtiga :
    - b. In saacadda dugsiga la yimaado.
    - t. Inaan safka laga daahin.
    - j. In macallinka xisadda looga hormaro.
    - x. Inaan lagu daahin fasaxyada gaaban.
2. In la dhawro xisadda.
    - b. Inaan xisadda laga daahin.
    - t. Inaan la hadlin xisadda dhexdeeda.
    - j. Waxaa la hadli karaa markii aad wax akhrinaysid, iyo markii aad jawaabaysid.
    - x. Markii aad baraha wax su'aalaysid, waa inaad farta taagtaa.
3. In la dhawro dugsiga :
    - b. Dugsiga waa inaan la jajabin.
    - t. In laga ilaaliyo wasakhda.
    - j. Inaad ilaalisid qalabka wax lagu barto : miisadaha, kuraasta, tabaashiirta, iyo qalabka kale oo ay ka mid yihiin albaabada iyo dariishadaha.
4. In la dhawro nadaafadda dugsiga :
    - b. In aad ka ilaalisid xaashiyaha iyo qashinka kale.
    - t. In aadan miisadaha korkooda wax ku qorin waxna ku xoqin.

j. In aadan darbiyada, gudaha iyo dibadda midna wax ku qorin ama ku masawirin.

5. In la dhawro dadka dugsiga :
Ardayda, macallimiinta iyo shaqaalaha kale.
   b. In aadan qofna wixiisa qaadin; qalinkiisa, buuggiisa iwm.
   t. In aadan qofna caayin, ama aadan wax u dhimin;
   j. In aad ixtiraamtid dadka dugsiga. Dadka dugsigu ama waa walaalahaa ama waa waalidkaa.

Dugsiga dibaddiisu nidaam buu leeyahay nidaamkiisa waxaa ka mid ah :

1. In aadan dariiqa dhexdiisa istaagin meesha ay baabuurtu marayso;
2. Marka aad dariiqa socotid, dhinaca midigtaada ah ka mar meesha dadka;
3. Dariiqa markii aad goynaysid, hareerahaaga iska fiiri;
4. Dariiqyada qaarkood waxaa ku yaal nalal tilmaamaya marka dariiqu furan yahay iyo markuu xiran yahay : nalka guduudan wuxuu kuu sheegayaa jidku inuu xiran yahay. Nalka cagaaran wuxuu kuu sheegayaa inuu jidku furan yahay. Markuu furan yahay mar : markuu xiran yahay ha marin.
5. Haddii aad qof dariiq ugu hortimaadid dhinacaaga midigta ah ka mar. Haddii dariiqu ciriiri yahay, ka joogso inta uu ku dhaafayo.

## Usluubta (Anshax)

Usluubta waa anshaxa wanaagsan ee qofka, waa akhlaaqda dadka iyo quruxda naftooda. Qofkii aan anshax lahayn waa xun yahay. Qofkii aan anshax lahayn dadku waa neceb yihiin oo waa laga cararaa. Anshax waxaa ka mid ah :

**B. Dugsiga dhexdiisa :**

1. In buugtaada iyo qalmaantaadu ay kuu xafidan yihiin.

2. In aad gacantaada iyo afkaagaba dhawrtid.
3. In labiskaagu uu nadiif yahay mar kasta iyo jirkaaga, timahaaguna ay shallaysan yihiin.
4. In aadan iska istaagin meel aadan shaqo ka lahayn.

**T. Gurigiinna dhexdiisa :**

1. In aad hagaajisid meeshaad seexatid;
2. In aad ilaalisid waqtiga guriga : saacadda cuntada, saacadda seexashada iyo saacadda shaqada.
3. In aad maqashid waalidkaa iyo walaalahaa, kuwa kaa waawyen, kuwa kaa yaryarna aad dhawrtid.
4. In aadan reerka kale u wareegin oo aadan dhibin ama aadan wax ka cunin;
5. Haddii ay martiyi guriga timaado, inaad soo dhaweysid;
6. Dadka kaā waaweyn marka ay hurdaan in aadan ku qaylin.

**Tillaabada 3aad :**

Ereyada madmadaw macnahooda aad u sharax. Qabadsii ilmaha meelaha muhiimka ah.

**Tillaabada 4aad : Shaqo ilmaha u dir**

1. U dir ilmaha inay ka soo sheekeeyaan sida ay dariiqa u gooyaan.
2. Ha soo masawireen dariiqyo isgoys ah (crosroads).
3. Ilmuhu ha ka soo sheekeeyeen sida ay cuntada u cunaan, iyo shaqada ay guriga ka qabtaan.
4. Ha soo masawireen ilmo edeb daran, iyo ilmo edeb fiican.
5. U dir ilmaha ha soo siyaarteen xabbiska, ha soo sawireen xabbiska oo muujinaya dad xiran.
6. Ilmaha da'daas jooga wax ma dhigi karaan laakiin wax waa sawiri karaan wax qoritaanka waalidkood bay kaalmaysanayaan.

Casharka 10aad

# BULSHADA UU ARDAYGU KU DHEX NOOL YAHAY

B. Guriga (waalidka iyo walaalaha).

**Tusaale Guud :**

Waxaa waajib ah in casharkaan ah guriga (reerka) : Waalidka iyo walaalaha, loo yeela xiiso gaar ah. Waalidka kuma cusuba ilmaha, ilmuhu waxay dunida ugu hor bartaan uguna jecel yihiin hooyada, iyo aabbaha inta badan. Waxay u baahan yihiin in la sii jeclaysiiyo oo loo sii wayneeyo. Sidaas waxaa lagu gaari karaa in ilmaha looga sheekeeyo sida waalidku u xannaaneeyo ilmahooda, gaar ahaan hooyada, laga bilaabo marka ay uurka ku siddo illaa marka ay waynaadaan.

Ka dhaadhici ilmaha inay leeyihiin waalid iyo walaal kale. Madaxda Dalka, gaar ahaan Madaxweynaha, macallinka, maamulaha dugsiga, ilaaliyaha, adeegaha dugsiga, ayeeyo, awoowe, abti, adeer, walaalaha waaweyn, iyo qof kasta oo ka da' weyn, xusuusi inuu u yahay **waalid** oo ay waajib tahay in la xurmeeyo.

Waxaa jira cudurro (ereyo xun) ijtimaaci ah ee ay ilmuhu ka bartaan guriga sabadiisa. Cudurradaasi waxay u badan yihiin **waalid iyo walaala cay** sida : hooyadaa, aabbahaa, walaashaa, waxaas ku samee iwm.

Carruurtu, sida badan, ereyadaas iyo kuwa la mid ah, ama ka xun ayey dhexdooda isku caayaan ama ku hadaaqaan. Haddaba, waxaa waajib ah in ilmaha carrabkooda laga gooyo ereyadaas, oo la baro inay xun yihiin. Xusuusi, hooyada, aabbaha. walaalka walaasha ay caayayaan inay yihiin waalidkood, walaalahood. Darisku waa arrin kale oo muhim ah. Uga sheekee daris wanaagga. xaqa dariska iyo sida dadka dariska ahi isku kaalmaystaan.

**Ujeeddada Darsiga :**

1. In ilmaha lagu tallaalo lana garansiiyo jacaylka iyo xaqa waalidka;
2. In la baro ilmaha in waalidkood uu badan yahay, qof kasta oo ka weyn;
3. In laga hortago lana gooyo ereyada xun xun ee ilmuhu ku hadaaqaan, iyo
4. In lagu tallaalo ruux isla shaqayn ah.

**Bandhigga Darsiga :**

Tallaabada 1aad : Su'aalo :

1. Yaa ii sheegi karaa waalidkiis?
2. Yaa ku siiyo wixii aad rabtid?
3. Dadka yaad ugu jeceshahay?
4. Hooyo iyo aabbe maahee, waalid kale ma leedahay?
5. Adiga iyo waalidkaa ma isla shaqaysaan? Xaggee?
6. Daris ma leedihiin? Ma isla shaqaysaan?

**Xusuus gaar ahaaneed :**

Su'aal kasta jawaabteeda ilmaha la doon. U hoggaami ilmaha inay helaan jawaabta. Su'aal kasta ka yool gaar. Su - aaluhu waa isasii furayaan. Bar ilmaha inay ka caada yeeshaan doonidda jawaabta; ha ka caada yeesheen inay fakaraan oo isku galsoonaadaan. Hubso inay ilmuhu garteen su'aalaha iyo jawaabteeda.

**Tillaabada 2aad :**

Tusaale : Ururinta casharka

Anigu waan jeclahay waalidkay, hooyo iyo aabbe. Hooyaday waan jeclahay aabbahay waan jeclahay. Ayagu waa ii roon yihiin. Wixii aan rabo waa isiiyaan. Waa ii naxariistaan. Igama caroodaan. Caradooda waa caradayda. Cara-

daydu waa caradooda. Jacaylkayga waa jacaylkooda waa jacaylkayga. Wixii ay ii diraan ma diido. Waxay iga reebaanna ma sameeyo. Aniga, hooyo, aabbe, abbowe, abbaaye, dhammaan waa isla shaqaynaa. Gurigaan iskala shaqaynaa.

Annagu daris fiican baan leenahay. Annaga iyo darisku waa wada shaqaynaa. Xaafaddaan wada nadiifinna. Golaha Hanuuninta waa wada tagnaa. Iskaa wax u qabsada waa wada shaqaynaa. Dhammaan waa is wada jecelnahay.

**Tillaabada 3aad :** Ereyada madmadow ku celceli. Hubso in ilmuhu macnaha garto. Mid mid ugu macnee. Ka yool gaar muraadka laga leeyahay.

**Tillaabada 4aad : Hees :** Dooro hees ilmuhu qaadaan. Heestu macnay leedahay. Si fudud ugu macnee.

**Tillaabada 5aad :** Shaqada hoos ku qoran u dir ilmaha :

1. U dir ilmaha inay soo masawiraan reerkooda (dadka).
2. Ha soo qoreen magacyada waalidkood iyo walaalahood.
3. Waydii shaqada ay isla qabtaan ayaga iyo waalidka, iyo darisku.
4. Waydii, afka, su'aalo ku saabsan darsiga gaar ahaan carruurta wax cayda.